

Maalinka Sannadka Cusub: Hoggaamiyaha Smith

Janaayo 01, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Hoggaamiyaha Danielle Smith waxay soo saartay bayaankaan loogu dabaaldagayo dhalashada sannadka 2023:

“Ayada oo sannadka cusub uu bilaabanayo, waxaa jira sababo badan oo dadka reer Alberta ay ku niyad samaan karaan.

“Dhaqaalaheenii wuxuu dib uga soo kabtay caqabado fara badan wuxuuna muujinaya calaamado sheegaya in uu xooggan yahay. Ganacsiyadu waa ay korayaan, ayaga oo abuuraya fursado iyo shaqooyin cusub, halka khayraadka Alberta laga dalbanaayo dunida dactaladeeda.

“Isla wakhtigaas, dowladeennu waxay si dhakhso ah gudogalaysaa xallinta dhibaha dhanka qiimaha ah, waxay sare u qaadaysaa helitaanka daryeelka caafimaadka waxayna garab taagan tahay gobolada kale si looga hortago ku tiirsanaanta federaalka ee xaddhaafka ah.

“Waxaa jirta wadda dheer oo naga horreysa si yoolashaan loo gaaro. Laakiin Alberta marna ma ay noqon himilo la’aan ama mayna ka gaabin dadaalka ay ku hiigsanayno guul. Si wadajir ah, waxaanu u ilaalin doonna una dhisi doonnaa gurigeenna quruxda badan, innaga oo ka dhigayna meel qof walba u wanaagsan.

“Reer Alberta ahaan, waxaan leenahay waxyaabo badan oo ay tahay in aan ka mahad celino iyo waxyaabo badan oo kale oo aynu u hanqaltaagno mustaqbalka. Waxaan dhammaantiin idiin rajaynayaa sannadka 2023 oo idiin noqda mid ammaan ah, farxad iyo guulo leh!”

Weydiimaha saxaafadeed

[Rebecca Polak](#)

Agaasimaha Xoghayaha Saxaafadda iyo Xiriirada Maalinlaha ah, Xaafiiska Hoggaanka